



Kumla kommun

Information

2020-10-13

Waalidiinta waxa lagu wargelinayaa in ardayda laga baaraayo caabuqa karoona

Dhakhtarka sare ayaa halka hoose ku faahfaahinaya waxa la iska rabo marka ardayda la baarayo.

Jiro iyo bogsasho, ku noqoshada xannaanada , iskuulka iyo meesha caruurta lagu hayo.

Isbadaladan cusub macnahoodu waa in la badalay wixii hore u jiray oo xitaa xanuun yar ay aheyd in aad guriga u joogtid. Waxaa ugu muhiimsan in la xasuusnaado in ay wali kaliya dadka caafimaad buuxa qaba ku soo noqon karaan iskuulka iyo meelaha carruurta lagu hayo (hadii uu wali xanuun hayn).

Hadii xanuunka laga helin:

Waa ay ku noqon karaan carruurta dugsiga ama xannaanada hadii ay xaalada caafimaad u ogolaaneyso.

Hadii xanuunka laga helo:

Ilmuhu waa in ay ugu yaraan joogaan guriga laba maalin oo bilaa qandho ah oo uu caafimaadkooda guudna fiican yahay, taa oo ah toddobo maalin ka dib marka uu xanuunka ku dhacay.

Xitaa hadii la baarin

Carruurta waa in ay guriga joogaan inta ay xanuun dareemayaan marka ay roonaadaana laba maalin oo kale iyaga oo caafimaad qaba. Inta waqtigaan lagu jiro waa in cunuga laga ilaaliyaa in uu u dhawaado dadka kale aan ka aheynd kuwa guriga kula nool. Hadii ay ilmaha wali uu hayo calaamad xanuun oo qafiif ah, sida hargab qalalan iyo duuf yar ilmuhu waa ay ku soo noqon karaan dugsiga iyo xannaanada hadii ay ka soo wareegtey toddobo cesho waqtiga uu xanuunsadey kadib. Waa in aadna sidaa yeeshaan markasta uu ilmaha xanuunsado